Doorashada madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 2018

Muwaadiniinta dalkan Finland waxaa ay lixdii sanaba mar soo doortaan madaxweynaha.

Doorashada koowaad:

- Maalinka doorashadu waa Axadda 28.1.2018
- Maalmaha doorashada hore ee dalka Finland gudihiisa waa inta u dhexeysa 17.–23.1.2018
- Maalmaha doorashada hore ee dalka dibaddiisa waa inta u dhexeysa 17.–20.1.2018

Suurtagalnimada doorashada labaad (haddii wareegga koowaad lagu kala bixi waayo):

- Maalinka doorashadu waa Axadda 11.2.2018
- Maalmaha doorashada hore ee dalka Finland gudihiisa waa inta u dhexeysa 31.1.–6.2.2018
- Maalmaha doorashada hore ee dalka dibaddiisa waa inta u dhexeysa 31.1.–3.2.2018

Shaqooyinka madaxweynaha

Madaxweynuhu wuxuu ansixiyaa sharciyada ay soo ogolaadeen xubnaha baarlamaanka.

Madaxweynuhu wuxuu hogaamiyaa siyaasadda dibadda ee dalka, isagoo si wadajir ah arinkaas ugala shaqeynaaya dowladda.

Madaxweynuhu wuxuu magacaabaa wasiirka koowaad (ra'iisul wasaaraha) iyo jagooyinka wasiirrada kaleba. Waxaa intaas dheer oo uu magacaabaa garsoorayaasha iyo qaar ka mid ah mas'uuliyiinta sar-sare.

Sidoo kale madaxweynuhu waa madaxa ugu sarreeya ciidamada difaaca dalka. Madaxweynuhu wuxuu ogolaanshaha baarlamaanka ku go'aamiyaa xilliyada dagaalka iyo nabadda.

Yaa xaq u leh inuu codeeyo?

Waad codeyn kartaa doorashada madaxweynaha,

- haddii aad tahay muwaaddin heysta dhalashada dalkan Finland
- haddii aad buuxisay da'da 18 ka sano ugu dambeyn 28.1.2018.

Yaad u codeyn kartaa?

Xisbiyada iyo ururada wax doorta waxaa ay musharraxiintooda u soo taagi karaan doorashada madaxweynaha. Musharraxu waa in uu yahay muwaaddin u dhashay dalka Finland. Musharrax walbaa wuxuu leeyahay lambar u gaar ah. Musharraxiinta madaxweynuhu waxaa ay ka sharraxan yihiin dhammaan dalka oo dhan, sidaas awgeed ayaad u codeyn kartaa musharraxii aad dooneyso. Warbixinaha ku saabsan musharraxiinta madaxweynaha waxaad ka heli kartaa tusaale ahaan joornaallada, telefishinka iyo internetkaba.

Kaarka codbixinta waxaa laguugu soo dirayaa guriga

Haddii aad xaq u leedahay codbixinta, waxaa guriga laguugu soo dirayaa waraaq. Waxaa waraaqda ku jira laba kaar cod-bixineed, waayo waxaa dhici karta in doorashada madaxweynuhu ay laba goor noqoto (waa haddii wareegga koowaad lagu kala bixi waayo).

Kaararka codbixinta waxaad ka heleysaa warbixinta ku saabsan goobta aad ka codeyn karto maalinka doorashada (oo ah maalinka ugu dambeysa doorashada). Sidoo kale waxaa ku xusan liiska goobaha laga codeyn karo maalmaha hore ee doorashada.

Hal ama laba codbixin

Waxaa dhici karta in doorashada madaxweynaha laba goor la galo. Haddiise uu mid ka mid ah musharraxiinta u tartameysa jagada madaxweynaha uu codbixinta ka helo in ka badan kala bar codadkii la bixiyay, waxaa qofkaas si toos ah loogu dooranayaa madaxweyne.

Haddii musharraxiinta midkoodna uusan helin in ka badan kala bar codadka, waxaa la qabanqaabinayaa codbixin labaad.

Codbixinta koowaad waxaa ay dhici doontaa 28.1.2018.
Codbixinta labaad ee suurtagalka ah in ay dhacdana waa 11.2.2018.

Ku codeynta guriga

Haddii aad tahay qof si aad ah naafo u ah ama muddo aad u dheer xanuunsan, waxaad codbixinta hore ku codeyn kartaa gurigaaga dhexdiisa. Faah-faahin dheeraad ah oo la xiriirta ku codeynta guriga waxaad ka heleysaa gudiga dhexe ee doorashada ee degmada aad degan tahay. Telefoonka gudigana waxaa uu ku qoran yahay kaarka wargelinta.

Sidaan baad hore ugu codeyn kartaa

Codbixinta hore ee doorashada madaxweynaha waxaad ka codeyn kartaa meel kasta oo ka mid ah goobaha codbixinta. Codbixinta hore waxaa ay dhici doontaa inta u dhexeysa 17.–23.1.2018. Haddii ay dhacdo in doorashada madaxweynaha loo qabanqaabiyo codbixin labaad, waxaa codbixinta hore ay dhici doontaa inta u dhexeysa 31.1.-6.2.2018.

Marka aad u socoto codbixinta waxaad hore u sii qaadataa aqoonsigaaga shakhsiyadeed, tusaale ahaan baasaboor, kaarka aqoonsiga (teesare) ama ruqsadda gaari wadista (leeysinka).

1. Waxaad aqoonsigaaga shakhsiyadeed tustaa howl-wadeennada ka shaqeynaya goobta dooraashada.
   Howl-wadeenku wuxuu hubinayaa aqoonsigaaga, wuxuuna ku siinayaa waraaqda codeynta.

2. Waxaad qaadataa waraaqda codeynta, islamarkaana waxaad gashaa qolka codeynta.
   Waxaad waraaqda codeynta si cad oo muuqata ugu qortaa lambarka musharraxa aad u codeyneyso.
   Waraaqda codeynta wax kale ha ku qorin.

3. Dhexda iskaga laab waraaqda codeynta.

4. Ku soo laabo halkii uu joogay howl-wadeenka.
   Waxaa uu shaabad saari doonaa waraaqda codeynta, waxaana uu ku siin doonaa baqshad midabkeedu bunni ama kafee khafiif ah yahay.
   Waraaqdii codeynta ku rid baqshadda, dabadeedna isku qabo labada af ee baqshadda oo iskula xir xabagta ama koollada marsan labada dhinac ee baqshadda .

5. Howl-wadeenku waxaa uu kaa codsanayaa inaad foomka saxiixdo.
   Saxiixaas waxaad ku qireysaa, inaad adigu tahay qofka buuxiyay kaarka codeynta, laguuna shaabadeeyay, islamarkaana aad baqshadda ku xirtey.

6. Ugu dambeyntiina howl-wadeenka ayaa baqshaddii doorashada iyo foomkaba waxaa uu dhexgalinayaa oo ku xirayaa baqshad kale oo midabkeedu yahay jaalle ama huruud, si loo diro waraaqda.

Markaad codeyso, waad ka bixi kartaa goobtii codbixinta doorashada.

Sidaan baad u codeyneysaa maalinka doorashada

Maalinka doorashada (oo ah maalinta ugu dambeysa ee codbixinta) waxaa goobaha codbixintu ay furan yihiin inta u dhexeysa 9-20. Ka hubi kaarka wargelinta goobta codbixinta ee aad ka codeyn karto.

Marka aad u socoto codbixinta waxaad hore u sii qaadataa aqoonsigaaga shakhsiyadeed, tusaale ahaan baasaboor, kaarka aqoonsiga (teesare) ama ruqsadda gaari wadista (leeysinka)

1. Waxaad aqoonsigaaga shakhsiyadeed tustaa howl-wadeenka ka shaqeynaya goobta dooraashada.
   Howl-wadeenku wuxuu hubinayaa aqoonsigaaga, wuxuuna ku siinayaa waraaqda codeynta.
2. Waxaad qaadataa kaarka codeynta, islamarkaana waxaad gashaa qolka codeynta.
   Waxaad waraaqda codeynta si cad oo muuqata ugu qortaa lambarka musharraxa aad u codeyneyso.
   Waraaqda codeynta wax kale ha ku qorin.

3. Dhexda iskaga laab waraaqda codeynta.

4. Ku soo laabo halkii uu joogay howl-wadeenku.
   Waxaa uu shaabad saari doonaa waraaqda codeynta.

5. Waxaad waraaqda codeynta ku ridaa sanduuqa doorashada.

Markaad codeyso, waad ka bixi kartaa goobtii codbixinta doorashada..

Yaad cawimaad ka heli kartaa?

Howl-wadeennada doorashada ayaad ka heli kartaa wixii talo ah ee la xiriira maalinka hore ee doorashada iyo maalinka doorashadaba, inta aad joogto goobta doorashada.

Goobta doorashada waxaa jooga caawiye qaabilsan arimaha doorashada . Haddii aadan adigu awoodin in aad buuxiso waraaqda codeynta, waxaad caawiyaha doorashada u kaxeysan kartaa qolka codeynta si uu kuu caawiyo.

Caawiyaha arimaha doorashada waxaa kuu noqon kara qof aad adigu keensatay, tusaale ahaan qof ehelkaaga ama qaraabadaada ah. Hase yeeshee caawiyuhu ma noqon karo qof musharrax ah ama musharraxa qaraabadiisa ah. Caawiyaha doorashadu cidna uma sheegi karo, qofka aad u codeysay.

Sirta doorashada

Qof walbaa isaga ayaa iska leh go’aanka ah inuu codeynaayo iyo in kale, iyo qofka uu u codeynaayaba.

Sirta doorashada waxaa loola jeedaa, in aadan cidna u sheegin qofka aad u codeyneyso.

Codee doorashada madaxweynaha!

Faah-faahin dheeraad ah oo la xiriirta codbixinta waxaad ka heleysaa:

vaalit.fi